



## **Dad marti ah ayaa iskugu yimiday kulanka Waxbarashada Hindida Dhaladka ah ee Title VI oo ka dhacay Jefferson**

Barnaamijka PPS ee Waxbarashada Hindida Dhaladka ah ee Title VI ayaa qaybtay habeenka sheeko sheegida iyo samaynta farsamada gacanta oo ka dhacday Dugsiga Sare ee Jefferson. Agaasimaha Barnaamijka, Angela Morrill, ayaa soo koobay kulanka:

“Waxaa jiray in ka badan 70 marti oo yimid cashada, sheeko sheegida, waxaa jiray in aanu samaynay guriga ka samaysan doolshe adag ‘gingerbread’, kaarka Christmas-ka oo la sameeyay, badhan ‘button’ la sameeyay iyo Laadhuuda ‘Dice’ Hindida Dhalaska ah oo ay ciyaareen martidayadu,” ayay sheegtay. “Waxaa jiray sheeko sheege ka socday qabiilka Shoshone Bannock ee Ed Edmo oo soo bandhiyay sheekooyinkiisa iyo Marcus Ball oo carruurta iyo dhallinyarada u qaybiyay dharka jirka ku dhegan ee gacmaha iyo lugaha la gashado. Waxa kale oo jiray in wax gacanta lagu sawirrayay, dhammaan dadka waaweyn ayaa la siiyay tigidho iyada oo markii loo wacay lambarkooda, ay dooran kareen hadiyad hoos taalay geedka hoostiisa. Wuxuu runtii ahaa habeen xiiso badan.”

[Fiiri sawirro dheeraad ah](#)